



Cusbooneysiinta ugu dambaysay: Ogoosto 18, 2020

## Hagista dib-u-furida ee Gobolka oo dhan Ciyaaraha Xirfada ah, Ku Laabashada Ciyaarta oo Xaddidan

**Amarka:** Amarka Fullinta Lambarka. 20-27, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

**Hirgelinta:** Illaa iyo inta ay hagista u baahan tahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waxaa loo hergelin karaa sida lagu qeexay Amar Fulinta 20-27, qoraalka 26.

**Khusaynta:** Hagistani waxa ay khuseysaa tababarada, tababarka iyo cayaarta isboortiyada xirfada ah ee isboortiyada gaarka ah ee gobolka oo dhan.

Ciyaartoyda/Kooxaha ku sugan banaanka Oregon ee ciyaar ugu safraya Oregon waa iney raacaan hagista lagu qeexay dukumintigan.

### Ciyaaraha/Isboortiyada Xirfada ah:

Kooxaha Ciyaaraha/Isboortiyada Xirfada ah ee raba inay ku ciyaaraan Gobolka Oregon waa inay u soo gudbiyaan borotokoolo Maamulka Caamifaadka Oregon (OHA) iyo xafiiska Gofanatooraha si ay u hubiyaan in tababarka, tartanka iyo ciyaarta ay waafaqsan tahay dhammaan hagista caafimaadka bulshada iyo shuruudaha marxallada ay ku jirto degmada. Tababarka, tartanka iyo cayaarta ma bilaabmi karaan illaa marka borotokoolada ay dib u eegaan oo ay ansixiyaan xafiiska Gobanatooraha iyo OHA.

Cayaaraha/Isboortiyada xirfada ah ee lagu tababaranayo la guna ciyaarayo gudaha Gobolka Oregon waa laga dhaafay dhamaan hagista isboortiyada kale ee la soo saaray iyo kooxaha isboortiyada xirfada ah waxaa laga filayaa inay u hoggaansamaan heerarka ay u sameysteen horyaal kasta ee tababarka, ciyaarta, raad-raacida xiriirada, baarista, karantiilinta iyo wixii ah xaga tixgalinta kale, oo ay ka mid yihiin borotokoolada ay ansixiyaan OHA iyo Xafiiska Gobanatooraha. Cayaaraha xirfada ah ee lagu ciyaaro Oregon waa inay u hoggaansamaan [Hagista Dib u Furista Marxalada Labaad ee OHA – Hawl wadeenada Goobta iyo Dhacdada.](#)

### Ilo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Hagida Maaskarada ee Gobolka oo dhan, Waji Daboolashada, Daboolka Wajiga](#)
- [Hagida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada](#)

**Helitaanka dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada ballaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).